



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/ War-saxaafadeed 013/07/11

Date: 24 July 2011

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya oo booqdey dhaawaca ciidamada dowladda, lana wareegay gaadiid cusub.

(Muqdisho, Axad, 24 July 2011): Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa maanta booqday dhaawaca ciidamada Qalabka Sida oo ku jira Isbitaalka AMISOM ee magaalada Muqdisho. Ujeedada booqashada ayaa aheyd dhiirigelinta ciidamada Soomaliyeed iyo u kuurgelidda xaaladda caafimaad ee ciidamada.

Ra'iisul Wasaare Cabdiweli Maxamed Cali ayaa yiri: "Waxaan aad iyo aad ugu faraxsanahay inaan booqdo dhaawaca ciidamada oo aan u kuurgalo xaaladdooda. Xukuumaddu waxey mudnaanta koowaad siineysaa amniga iyo sidii ciidamada loo haqabtiri lahaa baahidooda. Waxaan aad iyo aad ugu mahadcelinayaa takhaatiirkta iyo shaqaalaha Isbitaalka AMISOM iyo dadaalkooda u gar-gaarka ciidamada iyo shacabka soomaaliyeed.

" Aad iyo aad baan ugu faraxsanahay inaan gacan qaado ciidamada dhaawaca ah ee ku jira Isbitaalka, isla markaana aan ka wareysto xaaladdooda iyo baahidooda. Xukuumada waxaa ka go'an u adeegidda shacabka, gaar ahaan caafimaadka oo ah aasaaska nololaha."

Ra'iisul Wasaaraha ayaa u rajeeyey dhaawaca ciidamada inuu EEBBE bogsiiyo oo ay si dhaqso leh uga kabtaan dhaawacooda.

Ra'iisul Wasaaraha oo AU kala wareegey 3 gaadiid iyo 3 mootooyin casri ah

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali ayaa maanta kala wareegey Midowga Afrika (African Union) 3 gaadiid iyo 3 mootooyin oo loogu tala galay in Xukuumadda FKMG ah ay u isticmaalaan howlahooda muhiimka ah.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa u mahadceliyey Midowga Afrika (AU) iyo sida joogtada ah oo ay u garab istaagan yihiin Dowladda Soomaaliya. Waxuuna uga mahadceliyey deeqdan maanta oo uu sheegay in Xukuumaddu ay baahi weyn u qabto gaadiid lagu wado howlmaalmeedka Xukuumadda.

General Nathan Mugisha, Taliyaha Ciidamada AMISOM oo ku wareejiyey deeqdan Ra'iisul Wasaaraha ayaa sheegay isagoo ku hadlaya magaca Guddoomiyaha Midowga Afrika in Midowga Afrika ay mar walba diyaar u yihiin sidii ay u garab istaagi lahaayeen Dowladda iyo shacabka Soomaaliya.

Booqashada Ra'iisul Wasaaraha ayaa waxey imaanaysaa maalin ka dib markii shalay uu baarlamaanka si aqlabiyad ah ku ansixiyey xukuumadda cusub iyo barnaamijkeeda. Booqashadan ayaa muujineysa mudnaanta amniga oo ay xukuumaddu shalay ka hor ballanqaaday baarlamaanka.

- DHAMAAD -